

Maxay muhiim u tahay imaanshaha joogtada ah

Imaanshaha joogtada ah ee dugsiya waxay ilmahaaga u ogolaaneysaa:

- Inuu si buuxda u helo waxbarasho buuxda iyo inuu saameyo horumar xagga waxbarashadda
- Inuu helo xirfadaha dad la dhaqanka kula xidhiidho asxaabtiisa dugsiya iyo macallimiinta
- Inuu kalsoonidiisu kobocdo
- Inuu qabatimo habsami-u-socod iyo masuuliyad-qaadasho muhiim u ah guusha mustaqbalka

Taageeradda Kow

Waan garowsanahay in ardayda qaarkood ay la soo daristo duruufo sameyn kara imaanshahooda. Kooxda Imaanshaha ee Dugsiga waxay Diyaar u yihiin in ay idin siiyaan taakuleyn iyo tilmaan ardayda iyo qoysaska ay la soo daristo duruufo gaar ah. Haddii aad la kulanto wax dhibaato ah oo khuseeyaa imaanshaha la soo xidhiidh:

Mr Chase - attendance officer
Mrs Killeen - Assistant Headteacher Inclusion
Ms Wood - Parental support officer



Fasaxyada Xili-dugsiyeedka Dhexdiisa

Fasax lama ogola xili-dugsiyeedka. Fasaxa xili-dugsiyeedka wuxuu wax u dhimaa Waxbarashadda wuxuuna keenaa in ay ku dhaafaan fursado badan fasalka.

Si kasta ha ahaate, waxaan ogsoonahay in ay iman karto duruufo gaar ahaaneed, iyo xaaladaha durufaha gaar ahaaneed, fadlan u soo gudbi codsi qoraal ah maamulaha dugsiya.

Maxaa dhici kara haddii ilmahaagu maqnaado muddo fasax aan loo ogolaan?

Haddii aad ku maqnaato fasax ogolaansho la'aan ah xili-dugsiyeedka ama maqnaansho muddo kale Golaha Deegaanka Manjistar (Manchester City Council), waxaa laga yaabaa, in ay ku siiyaan ganaax lacageed (fine/fixed-penalty notice). Waxaad u baahan tahay in aad Golaha Deegaanka si toos ah ugu bixiso kharashka waa £80 qofkiiba 21 cisho ee ugu horeysa, ama £160 ilaa 28 cisho.

Go'aanka in lagu siiyo ganaax waxaa lagu saleeyaa in la buuxiyey heerka qaran oo ah:

- 10 cashar oo laga maqnaado ogolaansho la'aan xili-dugsiyeed dugsiya 10 todobaad oo xidhiidh ah.
- Haddii ay dhacdo mar labaad ka maqnaansho muddo fasax ogolaansho la'aan 3 sano gudaheed, waxaa lagu siin karaa ganaaxii labaad taasi oo ah ganaaxa sare oo dhan £160.
- Wixii ka maqnaansho dheeraad ah ee 3 sano gudaheed, micnaheedu wuxuu noqon karaa in dacwad maxkamadeed loo gudbin karo iyada oo wax ganaax ah la siin.